Paid Leave Oregon

# Tilmaamaha Foomka Xaqiijinta Xaalad Caafimaad oo Culus

## TILMAAMAHA CODSADAHA

Isticmaal foomkan haddii aad:

- Codsanayso fasax caafimaad oo la xiriira xaalad caafimaad oo culus oo adiga ku haysata **AMA**
- Codsanayso fasax qoys si aad u daryeesho xubin qoyska ka tirsan oo qaba xaalad caafimaad oo culus.

Bixiyaha daryeelka caafimaadka ee bukaanka waa inuu saxiixaa foomkan. Hoos ka akhri waxa loo aqoonsado xaalad caafimaad oo culus iyo liiska bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee la oggolaaday, qaybta Tilmaamaha Bixiyaha Daryeelka Caafimaadka.

**Tilmaamaha:**

- **Qaybta A:** Qaybtan ku buuxi macluumaadkaaga adiga oo ah codsadaha. Waa inaad ku qortaa magacaaga oo buuxa.
- **Qaybta B:** Buuxi Qaybta B oo keliya haddii aad codsanayso fasax qoys si aad u daryeesho xubin qoyskaaga ka tirsan oo qaba xaalad caafimaad oo culus. Qaybtan ku buuxi macluumaadka xubinta qoyska. Waa inaad ku qortaa magaca xubinta qoyska oo buuxa iyo taariikhda dhalashada. Ha buuxin qaybtan haddii aad codsanayso fasax mushahar leh sababo la xiriira xaalad caafimaad oo culus oo adiga ku haysata.
- **Qaybaha C iyo D:** Foomkan iyo Tilmaamaha Bixiyeyaasha Daryeelka Caafimaadka sii bixiyaha daryeelka caafimaadka ee bukaanka ee la oggolaaday. Hubi in bixiyaha adeega caafimaad ee la ogaaday , kaasoo xaqiijinaya xaaladda caafimaad ee culus uu buuxiyo oo saxiixo Qaybaha C iyo D.

**Muhiim:**

- Foomka lama taariikhayn karo lamana saxiixi karo wax ka badan 60 maalmood ka hor taariikhda la filayo inuu fasaxaagu bilaabmo. Ma aqbalno foom la saxiixay ka hor muddadaas.
- Foomka waxba lagama beddeli karo marka la buuxiyo oo la saxiixo ka dib (tusaale ahaan, lama oggola in wax lagu tirtiro xarriiq ama lagu daboolo dareere cad). Ma aqbalno foom si kasta wax looga beddelay. Haddii adiga ama bixiyahaaga daryeelka caafimaadku u baahan tihiin foom cusub, waxaad ka heli kartaan paidleave.oregon.gov bogga Resources.

Waa inaad bixisaa dhammaan macluumaadka loo baahan yahay. Macluumaad maqan wuxuu dib u dhigi karaa habaynta codsigaaga dheefaha ama wuxuu keeni karaa in codsiga la diido. Foomkan oo la buuxiyey iyo dukumeenti kasta oo kale ku soo geli akoonkaaga Frances Online ee frances.oregon.gov ama boostada ugu dir cinwaanka hoose.

**Attn: Paid Leave Oregon**
**Oregon Employment Department**
**875 Union St NE**
**Salem, OR 97311**

Habka ugu dhaqsaha badan ee dukumeentigan loo diro waa in lagu soo gudbiyo akoonkaaga Frances Online ee frances.oregon.gov.

**Ma u baahan tahay caawimaad?**

Macluumaadkani waa mid aad u muhiim ah. Waaxda Shaqaalaynta ee Oregon (The Oregon Employment Department, OED) waa wakaalad leh fursad loo siman yahay. OED waxay ku siineysaa caawimo bilaash ah si aad u isticmaasho adeegyadeena. Tusaalooyinka qaarkood waa luqadda dhegoolaha iyo tarjumaannada luuqada lagu hadlo, agab ku qoran afaf kale, far waaweyn, maqal iyo qaabab kale. Si aad u hesho caawimo, fadlan wac 833-854-0166 (lambarka bilaashka ah). Dadka isticmaala TTY waxay wacaan 711. Waxaad sidoo kale iimaayl u diri kartaa access.paidleave@oregon.gov.

## TILMAAMAHA BIXIYEYAASHA DARYEELKA CAAFIMAADKA

Codsadayaashu waxay foomkan u isticmaalaan inay xaqiijiyaan in:

- Ay u qalmaan fasax caafimaad oo la xiriira xaalad caafimaad oo culus oo iyaga haysata **AMA**
- Ay u qalmaan fasax qoys si ay u daryeelaan xubin qoyska ka tirsan oo qaba xaalad caafimaad oo culus.

Bixiyaha daryeelka caafimaadka ee bukaanka, kaas oo loo oggolaaday inuu caddeeyo xaaladda caafimaad ee culus ee codsadaha ama xubinta qoyska, waa inuu buuxiyaa oo saxiixaa foomkan.

Si aad u caddeyso xaaladda caafimaad ee culus:

- Dib u eeg macluumaadka hoose si aad u hubiso inaad buuxiso qeexidda bixiye daryeel caafimaad oo la oggolaaday iyo in xaaladda bukaanku buuxiso qeexidda xaalad caafimaad oo culus.
- **Keliya** buuxi Qaybaha **C iyo D** ee foomkan.
- **Qaybta C:** Ka jawaab dhammaan su'aalaha ku saabsan xaaladda caafimaad ee culus ee bukaanka iyo baahida fasaxa.

  **Muhiim:**

  Waa inaad ku dartaa ogaanshaha cudurka ama sharraxaad calaamadaha ama daaweynta loo baahan yahay oo ku filan xaqiijinta xaaladda; taariikhda qiyaastii ay xaaladdu bilaabatay ama abuurtay baahida fasaxa; iyo qiyaasta muddada fasaxa uu bukaanku u baahan yahay. Haddii codsaduhu codsanayo fasax goos-goos ah, ku dar sidoo kale qiyaasta inta jeer toddobaadkii ay xaaladdu ama daaweyntu dhacdo.
- **Qaybta D:** Qaybtan ku buuxi macluumaadkaaga. Sidoo kale saxiix oo taariikhee. Markaad saxiixdo, waxaad xaqiijinaysaa inaad tahay bixiye daryeel caafimaad sida OAR 471-070-1000 u qeexayo iyo in macluumaadka ku qoran foomkan uu yahay mid run ah oo sax ah .

  **Muhiim:**

  - Waxaan aqbalnaa saxiix gacan-ku-qoran iyo mid elektaroonig ah. Foomkan ma saxiixi kartid wax ka badan 60 maalmood ka hor taariikhda la filayo inuu fasaxa codsaduhu bilaabmo. Ma aqbalno foom la saxiixay ka hor muddadaas.
  - Waxba ha ka beddelin foomka markaad buuxiso oo saxiixdo ka dib (tusaale ahaan, ha ku tirtirin xarriiq hana ku daboolin dareere cad). Ma aqbalno foom si kasta wax looga beddelay. Haddii aad u baahan tahay foom cusub, waxaad ka heli kartaa paidleave.oregon.gov bogga Resources.
  - **Foomka la buuxiyey ee la saxiixay ku celi codsadaha.** Codsaduhu wuxuu foomkan ugu diri doonaa Paid Leave Oregon codsigiisa dheefaha.

**<u>Qeexidda bixiyaha daryeelka caafimaadka:</u>**

OAR 471-070-1000 wuxuu "bixiyaha daryeelka caafimaadka" ku qeexayaa:

1. Qofka ugu horrayn mas'uulka ka ah bixinta daryeelka caafimaadka codsadaha ama xubinta qoyska codsadaha ka hor ama inta lagu jiro muddada Paid Leave; qofkaas oo shati ama caddeyn u haysta inuu ku shaqeeyo si waafaqsan shuruucda gobolka ama dalka uu ka hawlgalo, ku shaqaynaya xadka shatiga ama shahaadadiisa xirfadeed, kana mid ah:
   - Dhakhtar laf-dhabar-hagaajiye (chiropractor) (oo keliya inta uu bixiyo daaweyn gacanta lagu hagaajinayo laf-dhabarta si loo saxo kala-bax yar oo raajo lagu xaqiijiyey)
   - Dhakhtar ilko
   - Umuliso si toos ah u tababaran
   - Dhakhtar daaweynta dabiiciga ah
   - Kalkaaliye caafimaad oo xirfadle sare ah
   - Kalkaaliye caafimaad oo xirfadle sare ah oo ku takhasusay umulisonimada
   - Dhakhtar indhaha (optometrist)
   - Dhakhtar
   - Kaaliye dhakhtar (physician associate)
   - Cilmi-nafsi yaqaan
   - Kalkaaliye caafimaad oo diiwaangashan
   - Shaqaale bulsho oo la nidaamiyo

2. Qofka ugu horrayn mas'uulka ka ah daaweynta codsadaha ama xubinta qoyska codsadaha isaga oo adeegsanaya oo keliya habab ruuxi ah ka hor ama inta lagu jiro muddada fasaxa mushaharka leh, oo ay ku jiraan, balse aan ku koobnayn, qof ku shaqeeya Christian Science.

**Qeexidda xaalad caafimaad oo culus:**

OAR 471-070-1000 wuxuu "xaalad caafimaad oo culus" ku qeexayaa:

Cudur, dhaawac, naafonimo ama xaalad jireed ama maskaxeed oo ku dhacda codsadaha ama xubin qoyskiisa ka tirsan, taas oo:

- U baahan daryeel bukaan-jiif ah oo laga helo xarun caafimaad sida isbitaal, hospice, ama xarun la dego sida guri dadka lagu xanaaneeyo
- Marka loo eego go'aanka caafimaad ee bixiyaha daaweynaya, keenaysa khatar dhimasho oo degdeg ah, ama leh saadaal cudur oo dhimasho ku dambaynaysa iyadoo ay jirto suurtagalnimo macquul ah oo dhimasho mustaqbalka dhow ah
- U baahan daryeel joogto ah ama aan kala go' lahayn, oo ay ku jirto daryeel guri oo uu bixiyo xirfadle caafimaad
- Ku lug leh muddada awood-darrada. "Awood-darro" waa inuusan qofku awoodin inuu qabto ugu yaraan hal hawl shaqo oo aasaasi ah, inuu dugsiga tago, ama inuu sameeyo hawlaha caadiga ah ee maalinlaha ah in ka badan saddex maalmood oo taariikheed oo xiriir ah. Muddada awood-darradu waxay ku jirtaa daaweyn kale oo loo baahan yahay ama muddada soo-kabashada ee la xiriirta isla xaaladda. Awood-darradu waa inay ku lug yeelato mid ka mid ah kuwa soo socda:
- Laba ama ka badan oo daaweyn ah oo uu bixiyo bixiye daryeel caafimaad
- Hal daaweyn iyo qorshe daryeel joogto ah
- Keenta muddada awood-darro ama daaweyn loogu talagalay xaalad caafimaad oo culus oo daba-dheeraatay, taas oo u baahan booqashooyin daaweyn oo xilliyeed, socota muddo dheer, oo sababi karta dhacdooyin awood-darro ah halkii ay awood-darradu joogto ahaan lahayd, sida neef, sonkorow ama suuxdin
- Ku lug leh awood-darro joogto ah ama muddo dheer ah oo ka dhalata xaalad aan daaweynteedu waxtar yeelan karin, sida cudurka Alzheimer, istaroog daran ama marxaladaha ugu dambeeya ee cudur. Shaqaaluhu ama xubinta qoysku waa inuu ku jiraa daryeelka joogtada ah ee bixiye daryeel caafimaad, laakiin khasab ma aha inuu helo daaweyn firfircoon
- Ku lug leh daaweyno badan oo loogu talagalay qalliin dib-u-dhis ah ama xaalad sida kiimoterabiga kansarka, daaweynta jimicsiga ee arthritis-ka, ama sifeynta kelyaha; haddii aan la daaweyn, xaaladdu waxay u badan tahay inay keento awood-darro ka badan saddex maalmood oo taariikheed
- Ku lug leh muddo kasta oo naafo ah oo ay sababto uur, dhalmo, dhicis ama ilmo meyd ku dhasha, ama muddo maqnaansho ah oo loogu talagalay daryeelka dhalmada ka hor
- Ku lug leh muddo kasta oo shaqada looga maqnaado ku-deeqidda qayb jir, xubin ama unug, oo ay ku jiraan adeegyada qalliinka ka hor ama ogaanshaha, qalliinka, daaweynta qalliinka ka dib iyo soo-kabashada.

**QAYBTA A: MACLUUMAADKA CODSADAHA**
Waxaa buuxinaya codsadaha. Dhammaan meelaha waa in la buuxiyaa, haddii aan si kale loo sheegin.

| | |
|---|---|
| Magaca koowaad: | Magaca dambe: |

Lambarka Sugnaanta Bulshada (SSN): ____________________________ (ikhtiyaari) ama

Lambarka Aqoonsiga Cashuur-bixiyaha Shakhsiyeed (ITIN): ____________________________ (ikhtiyaari)

Taariikhda dhalashada (MM/DD/YYYY): / /

| | |
|---|---|
| Nooca fasaxa la codsanayo: | ☐ Fasax caafimaad oo la xiriira xaalad caafimaad oo culus oo codsadaha haysata |
| | ☐ Fasax qoys si loo daryeelo xubin qoyska ka tirsan oo qaba xaalad caafimaad oo culus |

**QAYBTA B: MACLUUMAADKA BUKAANKA** (Haddii la codsanayo fasax qoys, waxaa buuxinaya codsadaha)

| | |
|---|---|
| Magaca koowaad: | Magaca dambe: |
| Taariikhda dhalashada (MM/DD/YYYY): / / | Xiriirka uu bukaanku la leeyahay codsadaha: |

**QAYBTA C: CADDEYNTA BIXIYAHA DARYEELKA CAAFIMAADKA**
Waxaa buuxinaya bixiyaha daryeelka caafimaadka ee bukaanka ee la oggolaaday. Dhammaan meelaha waa in la buuxiyaa, haddii aan si kale loo sheegin.

Bixiye daryeel caafimaad oo la oggolaaday waa inuu buuxiyaa oo saxiixaa qaybtan. Foom aan dhammaystirnayn ama wax laga beddelay wuxuu dib u dhigi karaa ama keeni karaa in la diido dheefaha codsadaha.

**Bixi xaqiiqooyinka caafimaad ee khuseeya oo ku filan xaqiijinta xaaladda caafimaad ee culus. Waa inay ku jiraan ogaanshaha cudurka ama sharraxaadda calaamadaha ama daaweynta loo baahan yahay ee xaaladda caafimaad ee culus.** Jawaabahaagu waa inay noqdaan qiyaastaada ugu wanaagsan, oo ku salaysan aqoontaada caafimaad, khibraddaada iyo baaritaanka bukaanka.

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

☐ Koodhka aasaasiga ah ee ICD-10 (ikhtiyaari): _______________

**Waxay ku sii socotaa bogga 6**

| Magaca codsadaha: | SSN ama ITIN: |
|---|---|

**QAYBTA C: CADDEYNTA BIXIYAHA DARYEELKA CAAFIMAADKA (Sii socota)**
Waxaa buuxinaya bixiyaha daryeelka caafimaadka ee bukaanka ee la oggolaaday. Dhammaan meelaha waa in la buuxiyaa, haddii aan si kale loo sheegin.

Kuwa soo socda kuwee baa khuseeya xaaladda caafimaad ee culus ee bukaanka? Calaamadee dhammaan kuwa khuseeya:

- ☐ **Daryeel bukaan-jiif:** Bukaanka waxaa la dhigay, ama la filayaa in la dhigo, isbitaal, hospice ama xarun caafimaad oo la dego si uu ugu hoydo.
- ☐ **Khatar dhimasho ama saadaal cudur oo kama-dambays ah:** Xaaladdu waxay keentaa khatar dhimasho oo degdeg ah ama saadaasheedu waa kama-dambays.
- ☐ **Daryeel joogto ah:** Xaaladdu waxay u baahan tahay daryeel joogto ah (tusaale, daryeel guri oo xirfadle caafimaad bixiyo).
- ☐ **Awood-darro iyo daaweyn:** (tusaale, qalliin jilib oo bukaan-socod ah ama lug jabtay) Xaaladdu waxay keentaa awood-darro ka badan saddex maalmood oo taariikheed oo isku xigta, taas oo bukaanka ka hor istaagta ama ka hor istaagi doonta inuu qabto ugu yaraan hal hawl shaqo oo aasaasi ah ama hawl maalmeed caadi ah **IYO** (mid dooro):
  - ☐ U baahan laba ama ka badan oo daaweyn ah, **AMA**
  - ☐ U baahan hal daaweyn iyo daryeel joogto ah
- ☐ **Xaalad daba-dheeraatay:** (tusaale, neef, sonkorow ama suuxdin) Xaaladdu waxay u baahan tahay booqashooyin daaweyn oo soo noqnoqda muddo dheer, waxayna sababi kartaa dhacdooyin awood-darro ah halkii ay joogto ahaan lahayd.
- ☐ **Xaalad joogto ah ama muddo dheer ah:** (tusaale, Alzheimer ama kansar heerkiisa ugu dambeeya) Xaaladdu waxay keentaa awood-darro joogto ah ama muddo dheer ah oo u baahan daryeel joogto ah, xitaa haddii bukaanku aanu helin daaweyn firfircoon.
- ☐ **Xaalad u baahan daaweyn badan:** (tusaale, kiimoterabi ama qalliin dib-u-dhis ah) Bukaanku caafimaad ahaan wuxuu u baahan yahay daaweyn badan; la'aantood, awood-darradu waxay u badan tahay inay ka badato saddex maalmood oo taariikheed.
- ☐ **Uur iyo dhalmo:** Bukaanku wuxuu leeyahay muddada awood-darrada ee ay sababto uur, dhalmo, dhicis ama ilmo meyd ku dhasha, ama wuxuu u baahan yahay inuu shaqada uga maqnaado daryeelka dhalmada ka hor.
- ☐ **Qof ku deeqa xubin/qayb jir/unug:** Ku-deeqiddu waxay u baahan tahay maqnaansho shaqo, oo ay ku jiraan adeegyada qalliinka ka hor ama ogaanshaha, qalliinka, daaweynta qalliinka ka dib iyo soo-kabashada.
- ☐ **Kuwa kore midkoodna ma khuseeyo:** Xaaladda bukaanku kuma jirto qaybaha kor ku xusan.

**Muhiim:** Haddii aad calaamadiso sanduuqan, xaaladdu ma buuxinayso shuruudaha xaalad caafimaad oo culus, codsaduhuna uma qalmo fasax caafimaad ama qoys.

**Waxay ku sii socotaa bogga 7**

| Magaca codsadaha: | SSN ama ITIN: |
|---|---|

**Bixi taariikhda ay xaaladda caafimaad ee culus bilaabatay, taariikhda ay abuurtay baahida fasaxa (haddii ay ka duwan tahay), iyo qiyaasta taariikhda dhammaadka.**

**Xusuusin:** Erayada sida "aan la garanayn" ama "aan la go'aamin karin" kuma filna go'aaminta u-qalmitaanka dheefaha Paid Leave Oregon.

Taariikhda bilowga xaaladda (MM/DD/YYYY): / /

Taariikhda ay xaaladdu abuurtay baahida fasaxa (haddii ay ka duwan tahay taariikhda bilowga) (MM/DD/YYYY):

Qiyaasta taariikhda dhammaadka (MM/DD/YYYY): / /

Haddii xaaladdu tahay mid daba-dheeraatay ama joogto ah, calaamadee sanduuqa hoose oo bixi taariikhda bilowga iyo taariikhda dhammaadka la filayo ee marxaladda hadda ee xaaladda.

☐ Xaalad daba-dheeraatay ama joogto ah

**Xaaladda ama daaweyntu ma saamaysaa bukaanka si goos-goos ah (ma aha maalin kasta)?**

☐ Haa

☐ Maya

**Haddii haa, waa imisa inta jeer ee ugu badan ee la filayo inay xaaladdu ama daaweyntu dhacdo?**

☐ Hal maalin toddobaadkii

☐ Laba maalmood toddobaadkii

☐ Saddex maalmood toddobaadkii

☐ Afar maalmood toddobaadkii

☐ Shan maalmood toddobaadkii

☐ Lix maalmood toddobaadkii

☐ Toddoba maalmood toddobaadkii

Fadlan si faahfaahsan u sheeg inta jeer ee toddobaadkii la filayo inay xaaladdu dhacdo ama qorshaha daaweynta la fuliyo:

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

______________________________________________

**Haddii xaaladda caafimaad ee culus ay la xiriirto uur, fadlan xaqiiji in bukaanku hadda uur leeyahay ama uu uur lahaa sannadkii ka horreeyey taariikhda bilowga fasaxa:**

☐ Haa

☐ Maya

Taariikhda dhalashada ilmaha ama taariikhda dhalmada la filayo (MM/DD/YYYY): __ / /

**Waxay ku sii socotaa bogga 8**

| Magaca codsadaha: | SSN/ITIN: |
|---|---|

| |
|---|
| **QAYBTA D: MACLUUMAADKA IYO SAXIIXA BIXIYAHA DARYEELKA CAAFIMAADKA**<br>Waxaa buuxinaya bixiyaha daryeelka caafimaadka ee bukaanka ee la oggolaaday. |
| ☐ Waxaan akhriyey qeexidda bixiyaha daryeelka caafimaadka iyo xaaladda caafimaad ee culus (OAR 471-070-1000). Waxaan caddeynayaa in macluumaadka lagu bixiyey foomkan uu run yahay oo sax yahay, iyo inaan ahay bixiye daryeel caafimaad sida lagu qeexay OAR 471-070-1000. |

| Saxiixa bixiyaha daryeelka caafimaadka (gacan-ku-qoran ama elektaroonig ah): | Taariikhda: __ / / |
|---|---|

| Magaca (koowaad iyo dambe): | Jagada ama takhasuska: |
|---|---|
| Lambarka shatiga ama shahaadada (ikhtiyaari): | Gobolka Maraykanka ama dalka (shatiga): |

| Nooca xirfadda caafimaad ama takhasuska caafimaad: | |
|---|---|
| Telefoonka: | Cinwaanka iimaylka (ikhtiyaari): |
| Magaca ganacsiga: | |
| Cinwaanka: | |